Erayga iyo Maanta Somtwt 0302
Ka fogaanshaha

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **'ka fogaanshaha'.** Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta.

Waxaana waxbariddan isku soo dubbariday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **'ka fogaanshaha'** oo aynu halkan idiinku lafa-guri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu wada dhegaysanno qasiiddadan macaan ee ay noo qaadayaan hobollo masiixiyiin ah soo Soomaali ah.

SONG: AAN AMMAANNO RABBIGA

Maanta waxaan ka hadli doonnaa firfircoonida laga doonayo masiixiyiinta sida ku qoran kitaabka Axdiga Cusub. Kolkii hore markii rasuul Bawlos la hadlayey iyaga waxay ula ekayd in firfircooniba aan loo baahnayn. Laakiin wakhti kaddib sidaad maqli doontaan, waxaad arkaysaa in firfircoonida iyo shaqadu tahay rabitaan si dadku ayan ka habaabin Ilaah.

Balse shakhsiyaadkaasu kama caajisin shuqulka iyo iyo sidii ay ugu go'een ama isugu dhiibeen Sayid Ciise Masiix laakiin si kale ayey wacdigii Injiilka u fahmeen. Waxaanan ka hadlaynaa maanta arrinka aan ugu yeeray, **'In laga fogaado dadka qaar'** Waana in qof la faquuqo, ama la in kiro, ama si cad oo muuqata looga wareegsado. Bal aynu la

soo kala baxno Warqaddii labaad ee rasuul Bawlos u qoray dadka reer Tesalonika cutubka 3:6-15, oo leh:

"Hadda walaalayaalow, waxaannu magaca Rabbigeenna Ciise Masiix idinku amraynaa inaad ka fogaataan walaal kasta oo si aan hagaagsanayn u socda oo aan ku soconayn cilmigii ay naga heleen. Waayo, idinka qudhiinnuba waad garanaysaan sida idinku waajibka ah inaad nagu dayataan; waayo, si aan hagaagsanayn uma aannu socon markaannu idin dhex joognay. Ninnana kama aannu cunin kibis aannan wax ka bixin, laakiin dhib iyo daal ayaannu ku shaqaysannay habeen iyo maalinba inaannan midkiinna culaysin; mana aha inaannan amar u lahayn, laakiinse waa inaannu masaal idiin noqonno oo aad nagu dayataan.

Waayo, xataa markaannu idinla joognay, waxaannu idinku amarnay, Mid hadduusan doonayn inuu shaqeeyo yuusan waxba cunin. Laakiin waxaannu maqalnay inay idin dhex joogaan kuwo si aan hagaagsanayn u socda oo aan innaba shaqayn, laakiin axwaalka dadka kale faraggeliya. Kuwa caynkaas ah waxaannu Rabbi Ciise Masiix ku amraynaa oo ku waaninaynaa inay xasilloonaan ku shaqaystaan oo kibistooda cunaan. Idinkuse, walaalayaalow, wanaagfallidda ha ka qalbi jabina. Haddii nin addeeci waayo waxaannu warqaddan ku qornay, ninkaas iska jira oo ha raacina si uu isugu yaxyaxo. Weliba sida cadow ha ula macaamiloonina, laakiin sida walaalkiin u waaniya."

Tan ugu horraysa ee halkan lagu soo qaadanayo waa erayga caajis ama kuwa aan jeclayn inay shaqeeyaan. Waa wax aan hagaagsanayn in qof lagu sifeeyo mashaqayste ama caajis. Erayga Ingiriisiga ah ee loo yaqaanno ama loo isticmaalo Caajisiinta waa Idol, marka dhanka kale laga eegana waa 'ilaah ku sheeg', oo dunidii hore waxay haysan jirtay sanam ka turjumaya 'ilaah ku sheegaas'. Waxaana la aaminayaa in qofku uusan wax shaqo ah qabanaynin haba yaraatee marka uu aaminsan yahay sanamkaas.

Laakiin haatan waxa halkan looga hadlayo taa way ka duwan tahay, waase wax ku saabsan dad aan doonayn inay shaqeeyaan iyo waxa qorniinku ka leeyahay. Kuwa badan oo raggaas ahna waxay xubno ka ahaayeen kiniisadda reer Tesaloniika, waxayna ku dul noolaayeen dadka kale. Wax lacag ah kama ayan dhiibi jirin cunnada ay cunaan, oo xil iskama saari jirin inay noqdaan dad wax soo saar leh welibana waxay ahaayeen dad masiixiyiin ah.

Sababtaas aawadeed ayuu Bawlos umuurtan ugu soo qoray cutubka 3aad ee Warqaddan labaad ee reer Tesaloniika. Maxay ahayd asbaabta uu uga hadlayey umuurtan? Waa hagaage, waxaa laga yaabaa inay jirtay asaab kalifaysay in dadka qaarkii noqdaan caajisiin oo ka dhigay inaysan shaqaysan. Waxaa la wada aaminsaaa in Ciise ka sarakacay dhimashada-intii ay socoto khudbadda sarakicidda Ciise Masiix, ayaa haddana la xusuusinayaa iyaga inay u yimaadaan Masiixa oo iskutallaabta lagu qodbay si uu dembigooda u qaado, oo markii uu dhimashada ka sara kacay wuxuu dadka siiyey

nolosha daa’imka ah. Adiga na dhegaysanayana sidaa iyo si la’eg ayaan kugu adkaynaynaa inaad masiixa qaabisho oo aad ka mid noqoto xerta Ciise Masiix raacday. Marka ay sidan tahay, waxaad adiguna ka helaysaa saamaxaadda dembiga Ilaaha Qaadirka ah, iyo ballanka nolosha daa’imka ah, oo waa wax quruxbadan! Haddaba, dadkii reer Tesaloniika way garanayeen intii aan kor ku soo sheegnay, waayo waxay ahaayeen jameeco masiixiyiin ah oo Bawlos kala hadlayey Injiilka.

Laakiin xaaladdan wacdiska ayaa lagu jiray dhowr sanadood, waxayna xaaladdii wacdiska Ciise ay ku soo dhammaatay sama’aadistii Ciise, oo jirkiisii isaga oo nool samada loo qaaday, iyadoo ay daawanayaan rasuullada ilaa ugu dambaystii daruurtu ay indhahooda ka qarisay. Waxaana qisadu ay ku qoran tahay kitaabka Falimaha Rasuullada Cutubka kowaad. Markii Ciise ka libray iyaga ayaa laba malag soo ag istaageen oo waxay ku yiraahdeen,

“Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan? Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa.”

Haddaba, wixii intaa ka dambeeyey kiniisaddu waxay sugaysay soo noqoshada Ciise Masiix. Haddaba, shakhsiyaadkan dhowrka sano sugayey soo laabashada Ciise Masiix ayey la ahayd inuu kol dhow soo noqon doono. Markaasina, wax lur ah iskama saarin inay nolosha dunidan xoogga saaraan waa qaar ka mid ahaa jameecadii reer Tesaloniika e. Waxay is lahaayeen, marba haddii Ciise soo

noqonayo saacad kasta, maxaa loogu baahan yahay in shaqo laysku qaxro? Maxaa faa'iida ah oo ku jira hawl adduun? Waxay kaloo is lahaayeen duniduba way soo dhamaanaysaa, oo innaguna waxaynu heli doonnaa nolosha daa'imka ah, maxaan isugu mashquulinaynaa dunida? Maxaan maskaxdayada ugu arbushynaa hawl adduun markaan ku sii jeedno jannada? Xaqiiqdii, Bawlos wuxuu rumaystayaasha ku dhiiro gelin jiray inay **"Ka fikiraan waxyaalaha samada jira, laakiin aanay marnaba ka fakarin waxyaalaha dhulka ama dunida."**

Markii uu sidaa lahaa ayey u qaateen in uu ula jeedo in imaanshaha Ciise ay soo dhow dahay oo ay shaqooyinka joojiyaan iyo inaanay waxba samaynin oo ay wakhtigooda geliyaan dhowrista soo noqoshada Ciise. Haddaba, Bawlos waxay ahayd inuu faham darrada haysata ka jaahil bixiyo maadaama aan la garanaynin wakhtiga uu soo noqonayo, wuxuuna ku adkeeyey inay wax soo saar yeeshaan.

Asbaabaha Ilaah u doonayo inaynaan caajisiin aan wax soo saar lahayn noqonno ayaa waxay tahay in jirka iyo maskaxdaba aynaan ka caajisin. Ilaah wuxuu doonayaa inaan jirka iyo maankaba u isticaalno ammaantiisa, iyo in markhaatifurka Masiixuna uu hagaago. Dadka kale ee aan masiixiyiinta ahayn way ina daawanayaan, oo haddii kuwa aan hadalka rumaysan ay arkaan inaan caajisiin nahay, taasi noo noqon mayso markaatifur wanaagsan iyo inaan Sayidka wax ku saabsan iyaga kala hadalno.

Wuxuu markaa Bawlos ku dhiirro gelinayaa inay ka fogaadaan dadka caynkaas ah. Waa ka dheeraansho

qasad ah oo laga dheeraanayo shakhsiyaadkaas. Haddaba, laba sabab ayaa loo yeelay in dadka Caynkaas ah laga fogaado: Marka kowaad masiixiyiintu maahayn inay ka fogaadaan dadka aan weli hadalka rumaysan ama kuwa rumaystay ee weli dembiga ku jira, marka labaadna waa inaan lagala qayb qaadan dunuubtooda iyo hawlaha ay samaynayaan. Labadaas marxaladoodba iyadoo ay jirto, ayaan laynaga doonaynin inaan katagno ama inaan isaga dhigno inaan nahay dad iyaga ka wanaagsan.

Taas la dooni maayo, waxaase laynaga dhowrayaa maaddaama aynu nahay iftiinka iyo cusbada dunida inaan la saaxiibno dadka aan weli hadalka rumaysan iyadoo dantuna tahay inaan tusno iimaankeenna oo u muujinno sida aynu u jecel nahay inay Masiixa u yimaadaan. Ka dheeraanshaha waxaa lagu samaynayaa wehelnimada dhexdeeda marka loo baahdo. Dadka caajiska ah baana laga dheeraanayaa, waa shakhsiyaadka dadka ka faa’iidaysanaya beddelkii ay taba rucaadda iyo hawsha ka qayb qaadan lahaayeen.

Dadka caynkaas oo kale ah ka dheeraan shiyahooda waa in la shaaciyaa. Maahan in iyadoo aan juuq loo dhihin laga tago oo aan waxba lagu darsanin oo ay la yaabaan waxa looga tagey, laakiin waa in loo sheegaa waxa lagu nacay. Taasina waxay dareensiinaysaa inaan waxba lagu darsan doonin haddii ay caajisiin sii ahaadaan oo ay wax qabsan waayaan. Waana sababta Bawlos u leeyahay ha loo sheego dadka caajisiinta ah ficilkooda oo waa in lagu caddeeyo dadaal la’aantooda.

Wuxuu kaloo yiri rasuul Bawlos, **"Ninkaas iska jira oo ha raacina si uu isugu yaxyaxo."** Qofkani waa inuu ogaado inaanu jameecada ka mid ahayn, ilaa uu maqlo waanada oo ka qayb qaato hawlaha laga dhowrayo. Waxaa ahmiyadda lehna waa sida loola macaamilayo, ee maahan in la eryo qofka. Xitaa markii qofku fogaado, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray cutubka 18 markaasoo qofka laga eryo jameecada kiniisadda haddii uu diido inuu toobadkeeno. Weliba markuu gaaro heerkaas, waa in rajo laga qabo qofkaa isaga ah inuu toobadkeeni doono oo ku soo noqon doono jameecada iyo wehelnimada xerta Ciise Masiix.

Yaanay noqon in lagu fakaro in dad laga eryo jameecada oo ay baaba'aan, laakiin waa in fursadda toobadkeenka la siiyo. Bal fiiri waxa rsuul Bawlos leeyahay sida ku qoran aayadda 15aad ee isla cutubkan 3aad: **"Weliba sida cadow ha ula macaamiloonina, laakiin sida walaalkiin u waaniya."** Dadka dhibkooda u gaarka ah ayaa haysta, in laga dheeraadana waa qaab qofka loo tusayo inuu is garto oo toobadkeeno. Qofkuna wuu is waansanayaa, oo si naxariis leh ayaa loola macaamiloonayaa, waana nidaam wacan oo masiixiyiinta u gaar ah. Qofka Masiixiga ah ee caajiska ah u dig oo la tali, hadduu diidana waxba ha ku darsan, ilaa uu is garto, hana akhristo 2 Tesaloniika cutubka 3aad. Qofka aan weli rumaysanse si wacan ula macaamil ilaa uu Masiixa u yimaado. Waxaana taa loo samaynayaa in la xoojiyo kiniisadda, waxaanan rajaynayaa inaad dareemaysaan jacayl iyo wehelnimo taam ah marka

nidaamka kitaabka Axdiga Cusub ku qoran la raaco, iyo inaad kalgacal kula macaamilooto si ay Masiixa ugu yimaadaan oo wehelnimada ugu soo biiraan.

SONG: AAN AMMAANNO RABBIGA

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe saacadahan oo kale isla idaacaddan. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan Telephone number 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna **www.twr360.org.** Farriinta waxaad ka soo hormarinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah **0707032060**